



SOMALISKA / SOOMAALI

# Isboortigu – waa bilow nolosha u wanaagsan

Ciyaaruhu waxay carruurta iyo dadka waaweynba siiyaan fursad ay ku dhaqdhaqaaqaan, iyagoo iskood isu xujaynaya oo baashaal ka helaya. Naadiga isboortiga waxaad ku daremi kartaa wadajir iyo adiga oo ka helaya saaxiibo cusub. Halkan waxaan ku sharaxeynaa sida isboortiga Iswiidhan u shaqeeyaan iyo sida aad xubin uga noqoto urur isboorti.

## GOF WALBA WUU U FURAN YAHAY

Ku dhowaad 19 000 oo ururo isboorti ah ayaa ka jira Iswiidhan qof kasta oo rabaana xubin ayuu ka noqon karaa. Macno ma samaynayso qofka aad tahay, meesha aad ka timid, diinta aad heysato, luqada aad ku hadasho ama meesha

aad ku nooshahay Iswiidhan. Isboortigu wuxuu u furan yahay qof walba, carruur iyo dad waaweynba. Ururo isboorti ah oo badan ayaa soo dhaweynaya qofka doonaya inuu tartamo iyo qofka doonaya inuu ciyaaro isagoon tartamayn.

## CIYAARO NOONEE AH AYAA JIRA?

In ka badan seddex milyan oo qof oo Iswiidhan ku nool ayaa xubno ka ah urur isboorti, qiyaastii saddex-dii qofba hal qof, waana sababtaas sababta isboortiga badanaa loogu yeero ”dhaqdhaqaaqa ugu weyn Iswiidhan” Dalka oo dhan waxaa ka jira ururo isboorti, markay noqoto isboorti shakhsiyeed sida jimicsiga, loolanka isbooriga ama ciyaarta ulaha barafka la

raaco iyo ciyaaraha isboortiga sida kubbadda cagta, kubbadda koleyga ama xeeqada barafka. Ciyaaraha qaar waxay dhacaan inta badan xilliga xagaaga, kuwa kalena xilliga jiilaalka. Weydii deriskaaga, macallinka isboortiga ee dugsiga ama saaxiibkaa oo soo ogow isboortiga meesha aad ku nooshahay oo naftaada ku tijaabi waxa aad jeceshahay.

## **NOLOSHA URURADU WAA MID SAMAFAL AH**

Dhammaan naadiyada isboortiga asal ahaan waa kuwo samafal ah. Tani waxay ka dhigan tahay inuusan jirin milkiile ama sheegasho macaash. Xubnaha ayaa go'aamiya sida ururku u qabanayo howlahiisa una caawinayo inuu mas'uul ka noqdo hawlo kala duwan Tusaale ahaan, waxay noqon kartaa habeenkii ama maalmaha fasaxa inay mas'uul ka noqdaan tababarada, iibinta makhaayadaha ama ka mid noqoshada mas'uuliyiinta qabanqaabinaya tartamada isboortiga. Naadiyada isboortigu la

mid ma aha shirkadaha gaarka loo leeyahay ee shaqaalaha mushahaaro laga siiyo

Dhaqaalaha ururada isboortiga waxay ka koo-ban yihiin lacag laga qaado khidmadaha xubinnimada iyo deeqaha degmada iyo dowlada. Laakiin sida caadiga ah kuma filna inay bixiyaan kharashyada waqtiyada tababarka, kirada lookaalka iyo safarada tartanka. Sidaa darted waxaa muhiim ah in dhammaan xubnaha, dadka waaweyn iyo dhallinyaradu, ay u caawiyaan si samafala ah.

## **SIDAN AYAAD XUBIN UGA NOQONAYSAA**

Dhammaan ururada isboortiga qiyaastii waxay leeyihiin websayt ama waxay ku yaallaan baraha bulshada halkaas oo ay ku qoran tahay cidda aad kala xiriiri karto haddii aad rabto inaad ku biirto ururka. Waxaad badanaa isku dayi karaa intaad marka hore isboortiga dhowr jeer tijabiso si aad u dareento bal inaad jeclaan doonto iyo in kale. Laakiin markaa waa inaad xubin ka noqoto si aad awood ugu yeelatid inaad sii wadato

tababarka oo aad u tartanto ururka.

Si aad xubin uga noqoto waxaad sheegaysaa magacaaga, cinwaanka emaylka, cinwaanka boostada iyo tobankaaga lambar (personnummer). Intaas ka dib, waxaad bixinaysaa khidmadda xubinnimada. Khidmadda xubinnimada waxaa la bixiyaa sanadkiiba mar ilaa inta aad rabto inaad ka sii mid ahaato xubinnimada ururka. Sababta keentay in aad sheegto toban-

kaaga lambar (personnummer) waa mararka qaarkood waxa looga baahan yahay caymiska iyo deeqaha la bixiyo. Laakiin looma adeegsado macno kale oo ka baxsan isboortiga.

Jaaliyaduhu waxay fursad u leeyihiin inay maareeyaan xogta shaqsiyeed qofka leh aqoonsi qarsoon (skyddad ID) ama leh lambar isku duwid ah (samordningsnummer).



## WAA IMISA QIIMUHU?

Inta aad adigu qiimaha lacagta xubinnimada ku bixinaysaa way ka duwan tahay iyadoo ay ku xiran tahay nooca ciyaaraha ay ku saabsan tahay iyo meesha aad waddanka ka deggen tahay.

Ciyaaraha qaarkood sidoo kale waa inaad diyaarsataa qalabka aad adigu u baahan tahay. Dadka qaar waxay dooraan inay iibsadaan qalabka ka iibsadaa dukaamada gacanta labaad ama xayeysiinta internetka. Xal kale ayaa ah inaad weydiiso kooxdaada

isboortiga haddii ay leeyihiin qalab aad ka amaahan kartid. Waxa kale oo iyaguna jira ururo wax caawiya. Tusaale ahaan Fritidsbanken, oo qalab isboortii si bilaash ah u amaahiya 14 maalmood qofkasta oo doonaya inuu tijaabiyo isboorti ama howlaha wakhtiga firaaqa.

Xitaa haddii ay lacag tahay ku biiri adigu naadi isboorti wax badan ayaa kuu soo noqonaya. Tusaale ahaan, tababarka, safarada tartanka, wadajirka, amniga iyo fursad lagu barto asxaab cusub.

sanadka soo socda iyo sida lacagta loo adeegsado.

Shirka sanadlaha ah xubnaha dhammaantood waxay leeyihiin codkooda. Waxaad u adeegsan kartaa inaad doorato qofka ka mid noqonaya guddiga ururka. Guddigu waa kooxdad ah oo markaa mas'uul ka ah ururka iyaga oo raacaya xeerarka guud ee jira iyo hubinta in ururka isboortigu uu fuliyo shirkii sanadlaha ahaa ee la go'aamiyay.

Ururada samafalka ahi waa ururo dimoqraadi ah. Taas macnaheedu waxa weeye inaad xubin ahaan xaq u leedahay inaad saamayn ku yeelato sida ururka isboortigu u shaqeynayo. Sanadkiiba hal mar, ururku wuxuu yeeshaa kulan sannadle ah oo qofkasta oo bixiyay khidmadda xubinnimada ay si wada jir ah uga doodaan kadibna go'aan ka gaaraan waxa ay tahay inuu qabto ururku

## XUBNAHA AYAA GO'AANSADA

## Su'aalo iyo jawaabo gaagaaban

### 1. Qofkee loo ogol yahay inuu ka qayb galo urur?

**Jawaab:** Hadafka isboortigu waa inay dhammaan qofkii raba loo ogol yahay inuu ka mid noqokaro! Maanta, waxay u muuqataa inay ururadu ku kala duwan yihiin iyadoo lagu salaynayo, tusaale ahaan, qaabka tababarka iyo tirada goobaha.

### 2. Ammaan ma yahay in aan ilmahayga u dirikaro naadi isboorti?

**Jawaab:** Waxaan sameyneynaa wax walba oo aan awoodno si aan carruurta oo dhan uga dhigno kuwo amni dareema waxaana jira tababaro ay hoggaamiyeyaasha isboortiga ka soo qeyb galaan oo ku saabsan sidii carruurta loogu abuuri lahaa jawi ammaan ah. Ururada isboortiga waxay sidoo kale raacaan qoddoba kala duwan, oo ah qawaaniin guud oo ku saabsan sida midba midka kale u wajaho, sida in aysan jiri karin ururka dhexdiisa ilmo la faquuqo, gacan ka hadal ama cunsuriyad.

### 3. Maxaan anigu bixinayaa?

**Jawaab:** Lacagta xubinnimada iyo mararka qaarkood kharashka tababarka iyo qalabka. Ka-qaybgalka ururka adiga oo matalaya tusaale ahaan inaad kaaliye ka noqoto tartan ama aad iibineyso tigidhada khamaarka waxaad ka caawinaysaa inaad kharashyada ururka hoos u dhigto.

### 4. Waa maxay sababta aan anigu uga mid noqonayaa urur?

**Jawaab:** Sababta oo ah adiga iyo ilmahaaguba waxaad ka heleysaan fursad inaad jimicsi samaysaan, dareento fiicnaan, baashaal iyo dadka oo aad la kulanto. Qaar badan, ururka isboortiga waa meesha aad ku leedahay asxaabtaada, halkaas oo aad u xiisayso markaad ka timaado iskuulka ama shaqa adiga oo ka qayb qaadnaya, saamayn ku yeelan kara dhex gelka dadka kale. Dadka qaarkood waxay xitaa u noqon kartaa waddo ay u sii maraan suuqa shaqada.

### 5. Maxaan anigu helayaa xubin ahaan?

**Jawaab:** Xubin ahaan waxaad fursad u heshay inaad wadajirka ka mid noqoto, saamayn ku yeelatid howlaha ururka ka socda oo aad ka qaybgasho aktiifite-etyada la siiyo dhammaan xubnaha.





## Xaqiiq RF-SISU

**Xiriirka Isboortiga Iswiidhishka (RF)** waa urur isu keena dhaqdhaqaaqa isboortiga waxaanay shaqadiisu tahay taageerida iyo horumarinta isboortiga Iswiidhan. RF wuxuu isugeyn ka kooban yahay 70 urur oo naadiyo gaar ah, 19 000 oo naadiyo isboorti ah iyo qiyaastii 3,3 milyan oo xubnood. RF waxaa laga heli karaa waddanka oo dhan heer degmo iyo heer gobolba.

**SISU waxbarashada isbooriga (SISU)** waa urur isboori dhaqdhaqaaq oo u gaar ah waxbarashada. SISU waxay waxbarasho siisaa dadweynaha iyo tababaro ururada isboortiga si ay aqoon u lehaan iyo inay awood u siiso fikradaha, ra'yiga iyo rabitaanka horumarka dadweynaha. SISU sidoo kale waxaa laga helikaraa wadanka oo dhan heer degmo iyo heer gobolba.



## Liiska ereyada

**Dhaqdhaqaaqa dadweynaha** – Waa koox dad tiro badan oo leh dan guud ah oo isku mid ah oo wadanka oo dhan ka qabanqaabsan.

**Kalkaaliye** – Waa qof ka mid ah ururka isboortiga oo ka caawiya tusaale ahaan tartan isboorti. Wuxuu mas'uu ka noqon kartaa biibitada (kiosken), inuu tuso martida meesha ay fariisanayaan ama inuu noqo garsoore hubiya in la raaco sharciyada tartanka.

**Samafal ah / kheyri ah** – Urur ama abaabul aan macaash doon ahayn. Urur isboorti waa mid aan faa'iido doon ahayn oo xubnihiisa ayaa caawiya oo mas'uul uga ah hawlo kala duwan. Naadiyada isboortigu la mid ma aha shirkadaha gaarka loo leeyahay ee shaqaalaha mushahaarka laga siiyo.

**Ururka isboortigu** – Ururka isboortigu wuxuu ka kooban yahay koox dad ah oo tababbarta isla markaana ku wada tartama hal ama dhowr isboorti. Ururka isboortiga waxaa loo soo gaabiyaa IF. Laakiin waxa sidoo kale

jira ururo isboorti oo leh soo gaabinta IK (naadiga isboortiga), IS (wadajirka isboortiga) ama SK (naadiga isboortiga).

**Lacagta xubinnimada** – Si aad ugu biirto naadi isboorti, waa inaad xubin ka noqotaa. Waxaad xubin uga noqonaysaa adiga oo bixinaya khidmada, tusaale ahaan lacag, sanadkiiba hal mar ururka isboortiga la siiyo.

**Guddida** – Urur kasta oo isboorti ahi wuxuu leeyahay guddi ay u codeeyeen xubnuhu kulanka sanadlaha ah. Howsha guddiga ayaa ah inay ururka hawshiisa wadaan ilaa iyo kulanka sannadlaha ah ee soo socda.

**Kulan sannadeedka** – Waxa jira kulan sannadkiiba mar loo qabto dhammaan xubnaha naadiga isboortiga. Xubin kastaa waxay leedahay hal cod marka kulanka sannadlaha ah la qabanayo. Inta kulanku socdo waxaa go'aan laga gaaridoonaada dadka ka mid noqonaya guddiga iyo sida uu noqon doono qorshaha ururka ee hawlgallada sannadka soo socda.